

# Xeerka anshaha ee ardayga

Macluumaadka ardayda, waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha.

**Dugsiyada dadweynaha ee NSW mid kasta wuxuu leeyahay oo u dadadaalaa heerarka ugu sareeya waxbarashada.**

**Xeerkan waxaa loogu talagalay dhammaan ardayda dugsiyada dadweynaha ee dhammaan NSW. Wuxuu khuseeyaa dhammaan nashaadka dugsiyada oo dhan, labadaba goobta dugsiyada inta la joogo iyo markaan la joogin, oo ay ku jiraan online, iyo siday ardaydu ula shakhsi ahaantooda u dhaqmaan iyo ardayda kale, macalimiinta, shaqaalaha dugsiyada iyo xubnaha bulshada.**

Waxaan raacaa Code ka si aan **xushmad badni, masuuliyad iyo ammaan** u muujiyo, iyo anoo raacaya tilmaamaha shaqaalaha iyo maclinka.

## Xushmee qof kasta

Tan micnaheedu waxaa weeye inaad tixgelin iyo faham yeelato si qof waliba u dareemo soo dhowayn iyo inuu ka mid yahay.

### Waxaan:

- u dhageysan ulana hadli doonaa si xushmad badan
- oo aan u ogolaan doonaa kuwa kale inay xoogga saaraan waxbarashadooda
- qiimaheeda oo aan ku daro qof kasta oo aan ula dhaqmo si caddaalad leh
- ka taxadaro jewiga dugsigeena
- oo si sax ah u xirto dharka dugsiyada oo faan leh.

## Masuul noqo

Tan micnaheedu waxaa weeye inaan ka taxadarno ficiladeena si qof walba wax u baran karo oo aa isula qabsano.

### Waxaan:

- tegayaayaa dugsiyada maalin kasta oo aan awoodo, imaanayaana dugsiyada iyo fasalka wakhtigii loogu talagalay, oo qaadanayaa waxaan u baahan ahay, diyaarna u noqonayaa inaan wax barto
- raacayaa xeerarka fasalka iyo dugsiyada iyo waxyaalaha sida joogradaha loo sameeyo
- una isticmaalayaa tignoolajiyada si ammaan ah iyo waxbarasho
- dhammaystirayaa shaqadayda guriga, iskudeyayaa sida ugu wanaagsan ee aan awoodo oo caawimaadna weydiisto markaan u baahan ahay
- caawinayaa kuwa kale markii aan awoodo
- wax ka baranayaa khaladaadka aan sameeyo waxaana isku deyayaa inaan wax hagaajiyo.

## Ammaan ahow

Tan micnaheedu waxaa weeye ka taxadarida nafsadaada iyo kuwa kale si qof kastaa uu ammaan ugu ahaado dugsigeena.

### Waxaan:

- raaci doonaa tilmaamaha macalimiintayda iyo shaqaalaha dugsiga
- xushmeyn doona kuwa kale aagooda, arimahooda gaarka ah iyo waxay leeyihiin
- u hadli doonaa kor oo weydiisan doonaa caafimaad haddii qof uun uu dareemaya ammaan daro ama loola dhaqamay si aan cadaalad ahayn
- u xalin doonaa kala duwanaanshaha si degan oo caddaalad ah.

## Si qofwalba uu ammaan u ahaado, waa inaan:

- aanan kula dhaqmin qofna si cadaalad daro ah sababtoo ah qofkaad tahay awgeed ama waxay igaga duwan yihiin aniga.
- aanan dagaalamin, dhaawicin, hanjabin, dhabin ama aanan qofna xoog u sheegan, oo ay ku jiraan isticmaalka taleefanada, qalab, kumbiyuutarno, online ama baraha bulshada
- keennin hub, maandooriye sharci daro ah, khamri, vapes, e-cigarettes ama tubaako dugsiga.

Haddii aan sameeyo waxyaalahan, shaqaaluhu wuxuu qaadi doonaa tallaabo si qof walba ammaan u ahaado oo uu u awoodo inuu waxbarto. Tan waxaa laga yaabaa inay ku jirto dugsiga ka joojin.

Macalimiinta iyo shaqaalaha dugsiga ayaa iga caafimaya inaan waxbarto, doorashooyin wanaagsan sameeyo oo aan ammaan ahaado. Waxaan raaci doonaa xeerarka, taageeri doona kuwa kale, xushmeyn doonaa xuquuqdo, oo aan la wadaagi doonaa fikradahayga si aan uga dhigo dugsigeyga meel wanaagsan oo wax lagu barto oo la lahaado.

Waxaan qirayaa inaan helay xeerka anshaxa ee ardayga waxaan sidoo kale qirayaa waxa layga rajeynayo ee la sharxay.

Magaca ardayga: .....

Aniga/Annagu waxaan qiraynaa inaan helaynay xeerka anshaxa ee ardayga oo aan qiraynaa waxa nalaga rajeynayo ee la sharxay.

Magaca waalidka/xannaaneeyaha: .....

Saxiixa waalidka/xannaaneeyaha: .....

## Adeega turjumaanka taleefanka

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad intaas ka sii badan fadlan wac maamulaha dugsiga. Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya weydiintaada, fadlan ka wac Adeega Turjumaanka Taleefanka 131 450 kuna weydiiso turjumaan luuqadaada.

U sheeg xiriiriyaha lambarka taleefanka ee aad dooneysid inaad wacdid xiriiriyahaana Khadka soo gelin doona turjumaan si uu kaaga caawiyo wadahadalka. Adeegan lacag luguguma dalici doono.